# Wax ka qabashada ku xadgudubka dhaqaale.



## Waa maxay ku xadgudubka dhaqaale?

Ku xad gudubka dhaqaale badanaa wuxuu dhacaa marka lacag loo isticmaalo awooda yeelasho iyo xakamaynta qofka kale. Xadgudubka dahqaale wuxuu qool gelin karaa dadku ku nool cilaaqaad xadgudub, wuxuu kaloo saamayn karaa awoodooda ay ku ahaadaan amaan haddii ay damcaan inay tagaan.

## Sidee caam u tahay?

Australia gudaheeda, ilaa 16% dumarku waxay wajihi doonaan xadgudub dhaqaale intay nool yihiin[1], ragana waa saameyn kartaa.

Xad gudub dhaqaale wuxuu samaayn karaa dhamaan arrimaha dhaqaale iyo dadka ka soo jeeda qawmiyadaha iyo dhamaan jinsiyadaha. Dadka dadka lixaad la'a ayaa khatar dhaqaale iyo xadgudub maaliyadeed ugu jiri kara iyada oo ay ugu wacan tahay waxyaalla ay ka mid yihiin ku tiirsanaanta iyo ku xirnaanta kuwa kale, la'aanta helitaanka ila dhaqaale, caqabadaha helitaanka xaq u yeelashada dhaqaalaha bulshada (Social Seurity) iyo xadadnaanta khibrada maaraynta dhaqaalaha[2].

Waa wax badanaa dhaca in dad dareemaan ceeb inay daqdi u keento markuu qofku ka hadalyo xadgudubka dhaqaalaha.

Waa muhiim inaad barato calaamadaha waxyeellaynta, meesha laga hello caawimada, iyo sida loo taakuleeyo xubnaha qoyska ama saaxiibada khatarta ku jira. Kani wuxuu caawimi karaa dhibanayaashu inay ka soo kabsadaan oo ay hellaan madaxbanaanidooda dhaqaale.

## Aqoonsiga xadgudubka dhaqaale

Sidaas oo ay tahay, xadgudubka dhaqaale wuu adkaan karaa in la aqoonsado:

- Kuwa badan waa ku adag tahay inay arkaan inay ku jiraan cilaaqaad xadgudub dhaqaale.
- Xadgudubka dhaqaale waxaa laga yaabaa inuu u bilawdo si tartiiba waqti ka dibna sii xoogaysto.
- Dhaqamada qaarkood, waxaa laga yabaa inuu aqbalo qof inuu kantaroolo dhamaan dhaqaalaha guriga.
- Mararka qaarkood, lacagta waxaa loo arkaa arrin gaar ah umana furno in laga wada hadlo.

[1] Kutin, Russell, Reid (2017), Xadgudubka dhaqaale oo ka dhexeeya dad nolol wadaag ah Australiya gudaheeda, xaallada caafimaad, cadaadiska iimeed iyo dhaqaale oo laga soo xigtay Australian and New Zealand Journal of Public Health

[2] www.commbank.com.au/content/dam/commbank-assets/support/2021-09/unsw-disability-report-4.pdf

Commonwealth Bank of Australia ABN 48 123 123 124 AFSL iyo Australian credit licence 234945.

## Calaamadaha xadgudubka dhaqaale qaar ka mid ah:

Ma hubtid in aad ku jirto cilaaqaad xadgudub dhaqaale iyo in kale?
Weydii naftaada su'aallaha soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| Qof aad wada nooshihiin marna ma kaa joojiyey inaad shaqo hesho ama shaqo raadiso? | Marna ma lagugu cadaadiyey inaad joojiso inaad dhakhli hesho ama joojiso helida ama bixinta lacagtaada? | Qofkaad isqabtaan ma kuu diiday inaad bixiso kaalmada ilmaha ama caawinto ilmaha? |
| Qofkaad isqabtaan ma kantaroollaa sida loo bixiyo wixii dhaqale ku soo gala? | Qofkaad isqabtaan ma daba galaa wixii aad bixiso ama ma ku weydiyaa inaad tusto wixii rasiityada waxaad soo gaday? | Marna ma laguu diiday inaad hesho lacag ama mase tahay inaad warsato lacag kharaj asaasi ah oo naftaada ama carruurtaada? |
| Marna ma lagaa hor istaagay inaad door ka qaadato dakhliga guriga? | Ma lagu weydiisatay inaad qabato shaqooyin ama "ixsaan" si aad lacag u hesho? | Ma lagugu khasbay inaad deyn qaadato ama kaarka deynta oo magacaaga ku qoran? |
| Lamaanahaagu ma ka dhigay dakhligiisa ama dhaqaalaha qoyska mid qarsoon? | Fikradaada ma la diiday go'aanada dhaqaale ee masiiriga ah? | Ma lagugu cadaadiyey inaad ka shaqayso ganacsiga qoyska lacag la'aan? |

## Sida lagu hello kaalmo

Haddii qof aad taqaan ay haysato dhibaato dhaqaale, ama aanu hubin, waxaa jira adeegyo lacag la'aana oo aad helli karto. Haddii xaallada degdega tahaay ama aadan dareemayn badqab, mar walba wac **000**.

- Meesha ugu horraysa oo aad wacayso waxaanu ku talinaynaa **1800RESPECT** oo ah **1800 737 732**. Adeegaani wa lacag la'aan waanaa qarsoodi taas qeybna kama ahan Commonwealth Bank.
- Haddii aad u baahan tahay fasire ama tarjumaan, waxaad isticmaali kartaa adeega Afcelinta iyo Tarjumaada oo ah (TIS National) oo laga wacayo **131 450**, sheeg luqada aad u baahan tahay weydiina inay la xiriiraan 1800RESPECT tel: 1800 737 732. TIS National ayaa la heli karaa lacag la'aan.
- Waxaad kaloo, ka wici kartaa **1800RESPECT** tel **1800 737 732** weydiina turjumaan. La taliyaha ayaa samayn doona qabanqaabinta.
- Haddii aad ka welwelsan tahay dabeecada, waxaa jira kaalmo qarsoodi ah oo lagu heli karo lacag la'aan. Wac Adeega Xawilaada ragga **1300 766 491** ama kula sheekayso online **ntv.org.au**.

Si aad wax badan ugu bartotaageerada, booqo **www.commbank.com.au/support/next-chapter.html**

Wixii macluumaad intaas ka badan akhri Tusahah Aqoonsi oo hel tusaha **CommBank website**.